Nuxurka muxaadaradii: الإلحاد خطره، وإبطال شبه الملحدين

Muxaadarada waxa galay sheekha weyn ee Somaliland:

الشيخ عبد الكريم حسن حوش، أطال الله عمره في طاعته، ونفعنا بعلومه

Taariikhdu markay ahayd: 14/08/2020 jimce, bacdal maqrib

Sheekhu waxa uu markii u horraysay ka hadlay macnaha uu leeyahay ilxaadku, iyo asalkiisa carabi ahaan, waxana uu sheegay in macnihiisa luqa ahaan looga jeedo: **iilin**, macnahaasina waxa uu ku soo arooray qur'aankaba:

قال الله عزَّ من قائل: (وذروا الذين يُلحدون في أسمائه) (إنَّ الذين يُلحدون في آياتنا لا يَخفون علينا)

Waxa waqtiyadan dambe looga jeedaa: **Alle-koodnimo**, ama in la diido ilaahay jiritaankiisaba, ama laga hadlo ujeedada uu u samaynayo falalkiisa,iwm.

Intaa dabadeed waxa uu sheegay sheekhu; in dadka alle-koodka ah ay u kala baxaan qaybo kala duwan, ayna ka mid yihiin:

1. Kuwo ilaahayba jiritaankiisa dafirsan
2. Kuwo ka shakinaya ilaahay jiritaankiisa
3. Kuwo leh waa jiraa allah, hase ahaatee markii uu abuuray makhluuqaatkan iyo kawnkan ayuu ka laabtay gacanta, wax maamul ahna kuma laha kawnkan.

Saddexdaa qoloba waxa midaynaya, in ay wada gaalo yihiin.

Sheekhu waxa uu tilmaamay in **Alle-koodnimadu** ay markii hore ku faafsanayd yurub iyo maraykan, waxyaabaha ka qayb qaatay arrintaasina waxa ka mid ah, in kiristaanku ay la yimaaddeen waxyaabo badan oo caqliga iyo cilmigaba ka hor imanaya, waxana ka mid ah waxyaabahaa ay la yimaaddeen:

1. In ay yidhaahdeen; saddex la isku daray ayaa isku ilaah kaliya ah:

الأب والابن وروح القدس

Taasina waa mid xattaa caqligii ka hor imanaysa: 1+1+1=1???

Waxa kale oo ay yidhaahdeen, Nabi ciise (allaah nabadgalyadiisu korkiisa ha ahaatee) waxa dilay yahuud, waxana ay leeyihiin: Nabi ciise waa inankii ilaahay (ilaahay ayaa ka hufnaaday waxaa ay leeyihiine), waxana macruuf ah; haddii boqor uu ka taliyo meel, oo dadkii uu u talinayay qaarkood ay dilaan wiilkiisii, in uu boqorkaasi shaqo culus ka qabanayo dadkaas.

Waxyaabo kale oo badan oo caqliga iyo cilmigaba ka hor imanayana way la yimaaddeen kiristaanku.

Markaa **Alle-koodnimadu** yurub iyo maraykan aad ayay ugu faafsanayd, ilaa haddana aad ayay ugu faafsan tahay.

Waxana ka sii qayb qaatay arrintaa; in ay ka soo baxeen Russia iyo china niman shuyuuciyya ah oo diin la'aan ku baaqaya, lehna:

لا إله والحياة مادَّة

Nimankaasna waxa ka mid ahaa: Karl Marx, Leon, and Engels

Markaa nimankaasi waxa ay la yimaaddeen; in jiritaankii ay ku sugaan kaliya in dareemayaasha lagu ogaado shayga, oo ama la uriyo,ama la maqlo, ama la taabto, ama la arko, xattaa cilmigii tajriibiga ahaa ay diideen.

Waxa sheekhu uu soo raray kutubta qaarkood oo **Alle-koodka** ka warrantaa sheeko ay sheegaan; oo Nin macallin ah oo **Alle-kood** ah ayaa galaas u soo galay carruur lixaad ah ay fadhido, dabeetana waxa uu ku yidhi ardaydii yaryarayd: aniga ma I aragtaan? Markaas ayay yidhaahdeen: haa, waxa uu yidhi: markaa anigu waan jiraa oo mawjuud Ayaan ahay, waxyaale kale oo uu miisku ka mid yahayna wuu waydiiyay, wayna uga jawaabeen, markii dambe ayuu yidhi: ilaahay miyaad aragtaan? Markaas ayay yidhaahdeen: maya, markaas ayuu ku yidhi: markaa ilaahay ma jiro.

Wiil yar oo maskax badan ayaa ku yidhi ardaydii: Macallinka caqligiisa, miyaad aragtaan? Markaas ayay yidhaadeen: maya, markaas ayuu yihi: markaa macallinku caqli ma laha.

Waxa kale oo uu sheekhu sheegay in waqtigii hore dalka India ay ka jirtay koox la yidhaahdo (**سُمَنِيّة**) kooxdaasi waxa ay wax ku sugi jireen kaliya dareemaha, mar ayay kulmeen: **الجهم بن صفوان** oo nin lunsan ahaa, hase ahaatee

noolaa waqtigii salafka, dabeetana waxa ay kooxdaasi ku tidhi: ilaahan aad sheegayso miyaad aragtay? Miyaad urisay? Miyaad taabatay? Markaas ayuu yidhi: maya, dabeetana waxa ay ku yidhaahdeen: ma jiro allaha aad sheegaysaa.

Taasi **Jahm** waxa ay ku keentayba shaki, iyo in uu salaaddii afartan cisho ka tago, oo ilaahayba ka shakiyo, markii dambe ayuu is weydiiyay: waar maxaad nimanka ugu odhan weyday: caqligiina ama ruuxdiina, miyaad aragteen?

Halkii ayuuna shakigii ka baxay.

Waxa sheekhu uu sheegay in aanay sax ahayn, dareemaha oo kaliya ayaa wax lagu sugayaa, maxaa yeelay, dareemuhu marar badan ayay been sheegaan, ama khiyaamaan, tusalayaal ayaanu arrintaa ka sheegay sheekhu, uu ka mid yahay dhalanteedku.

Waxa kale oo uu sheegay sheekhu in dadkaa **Alle-koodka** ahi ay aad ugu talax tagaan caqliga, oo waxyaalo badan oo sharci ah ayay odhanayaan; caqliga ayaa diidaya. Caqliguna sidii dareemaha waa gafi karaa, caqliga hebel wax uu bannaynayana ayuu caqliga mid kale mumtanic ka dhigi karaa.

Sheekhu waxa uu sheegay dadkaa **Alle-koodka** ah waxyaabaha ay in badan ka hadlaan in ay ka mid tahay: in kownkani waligiiba uu jiray, oo azali uu yahay, qaar ka mid ahna waxa ay yidhaahdaan: wuu soo darriyay, oo maaha qadiimi, hase ahaatee cid soo darrisiisay ma jirto, qaarna waxa ay yidhaahdaan isagaa isasoo darisiiyay.

Warka ku saabsan; caalamku waligiiba wuu jiray, oo waa azali, waa bar kuma taal, maxaa yeelay cilmiga saynisku waxa uu sugay sida uu sharciguba u sugay, in caalamkani aanu waligii jirin, ee uu soo darriyay.

Ta ay yidhaahdeen: isagaa is abuuray caalamku ama is jirsiiyayna, waa wax lagu qoslo, oo lala yaabo runtii, maxaa yeelay intaanu jirin ka hor wuxu ahaa wax aan jirin, wax aan jirin siduu naftiisa u jirsiin karaa, haddii ay yidhaahdaan; isagoo jira ayuu is jirsiiyayna, waxa la odhanayaa: waa **تحصيل حاصل** wuu jiraabee, muxuu is jirsiiyaa.

Sheekhu waxa uu sheegay qaar **Alle-koodka** ka mid ah in ay yidhaahdeen: caalamku markii hore waxa uu ka dhignaa dhibic yar, dabeetana

waxa dhacay **الانفجار العظيم** qaraxii weynaa, dabeetana caalmkan habaysan ayaa ku yimi sidaa, waxana uu sheegay sheekhu in aragtidaasi ay aad ugu ololeeyaan dadkaa **Alle-koodka** ahi.

(waxa ay culamadu tilaameen in aragtidaa الانفجار العظيم ay ka mid tahay waxyaabaha loo daliishado cilmi ahaan iyo saynis ahaan kawnkan iyo caalamkani in uu soo darriyay, sidoo kale waxa ay Alle-koodkii sameeyeen in ay qariyaan nadariyadaa, ama ay dhalleeceeyaan, oo qaarkood waxa ay ku tilmaameen in ay tahay aragti la nacayo, ama caqligii sayniska dabbaqayay uu nacayo, markaa ta ku saabsan in aragtidani ay tahay mid aan dalill sharciya loo hayn waa sax, hase ahaatee ta ku saabsan aragtidan waxa daliishada oo aad ula dhaca dadka Alle-koodka ah taas daymo ama mulaaxado ayaa ku sugan, waana Meesha qaar mulxidiinta ka mid ahi ay ku qabsadeen sheekha)[1]

Waxa kale oo uu sheekhu ka warramay; **قانون السَّببيَّة** oo ah: shay kaste oo soo darriyaa in uu leeyahay cid soo darrisiisay, qaanuunkaana waa qaanuun caqliga lagu garanayo, sayniskuna uu sugay, waxana uu tilmaamay sheekhu in farqi uu u dhexeeyo: **كلُّ موجود لا بدَّ له من موجِد** iyo **كلُّ محدَث لا بدَّ له من حادث**[2] oo cibaarada hore waa sax, hase ahaatee weedha dambe sidaa waa ku qalad, in lagu qaydo ama lagu dabro mooyaane: **كل موجود من عدم لا بدَّ له من موجِد** si aanu usoo galin allaah, maxaa yeelay allaah waligii waa jiray, wuuna jiri doonaa waligii, sidaa haddii loo sii daayana oo aan lagu dabrin qaydkaa waxa ka dhalanaysa:

تسلسل الموجودات.

Sheekhu waxa uu ku yara dheeraaday caddaymaha caddaynaya ilaahay jiritaankiisa, iyo caalamkan inuu isagu jirsiiyay, uuna maamulayo, tusaalayaal aad u bandanna arrintaa wuu u yeelay.

وفي كلِّ شيء له آيةٌ * تدلُّ على أنَّه واحد**

Waxa uu sheekhu tilmaamay in kuwo aad ugu doodi jiray **Alle-koodnimadu** ay ka soo noqdeen, ayna sugeen in khaaliq abuuray kawnkani uu jiro,

---

1 ما بين القوسين تنبيه مني

2 هكذا، والمراد: كل محدَث لا بدَّ له من محدِث

Waxa ka mid ah nimankaas: **Antony Flew,** ninkaasi aad ayuu ugu ololeeyay **Alle-koodnimada**, waxana uu ka qoray ku dhowaad 30-dhiggane, oo uu ugu doodayo, markii dambe waa ka soo noqday **Alle-koodnimada**, waxa uuna qoray dhiggane la yidhaahdo: **There Is a God**. Waxa uuna ku qoray dhigganahaa in caalamkani uu yahay mid soo darriyay, khaaliq abuurayna uu leeyahay.

Nasiib darro, ma islaamin **Antony Flew,** dadka qaarkood oo yidhaahda; wuu islaamayna, warkoodu sax maaha, waxa uu yidhi laftiisu: **"anigu ilaah kama dhiganayo kan ay kiristanku ilaah ka dhigtaan, ka yahuuddana ilaah ka dhigan maayo, kan saddaam xuseen-ka digtaatooriga ah uu ilaah ka dhigtana ilaah iima aha"**





Waxa baraarujin mudan in dhigganahaa **Antony Flew** uu qoray lagu ciyaaray magaciisii, oo in badan waxa lagu daabacay magac ah: **There Is No God, ama ليس هناك إله** taasina waa ciyaar lagu ciyaarayo dhigganahaa, iyo xuquuqdii qoraagiisa, ee dhigganuhu waxa uu ku saxan yahay: **There Is a God, ama هناك إله.**

Sheekhu waxa uu baraarujiyay arrin muhim ah oo ah: in aan lagu qiimayn diinta islaamka ashkhaasta u nisba sheeganaysa, ee ay dhici karto mukhaalafaat badan in ay ku sugan yihiin, ee waxa habboon in lagu qiimeeyo

saxnimadiisa nusuusta kitaabka iyo sunnada, ama jiilkii hore ee nabiga (NNKH) iyo saxaabadiisa ahaa.

Sheekhu waxa uu tilmaamay dadkaa **Alle-koodka** ah in ay ku nool yihiin nolol cidhiidhiya, oo aan degganayn, in badanina ayba is dilaan, allaah subxaanah ayaana inoo tilmaamay, qof kaste oo ka jeesta ilaahay dikrigiisa iyo diintiisa, in uu ilaahay ku noolaynayo nolol cidhiidhiya:

(ومن أعرض عن ذكري فإنَّ له معيشةً ضنكًا ونحشره يوم القيامة أعمى، قال ربِّ لم حشرتني أعمى وقد كنتُ بصيرًا)

Waxa uu sheekhu muxaadaradiisaa ku soo gunaanaday talo uu u soo jeediyay cid kasta oo aan aqoon ku filan lahayn, oo dhagaysata, ama ku xidhan shubhooyinka **Alle-koodka**, ama galaysa website-yo ay ka faafiyaan aragtiyadooda qalloocan, Nabigu (sallalaahu calayhi wasallama) waxa uu yidhi:

(من سمع بالدَّجَّال فلْيَنْأ عنه)

(qofkii ku maqla dajjal acwar meel ama dhul, ha ka fogaado)

Waxa midaynaya **Dajjaal Acwar** iyo nimankaas **Alle-koodka** ah, waxa weeye in labada qoloba ay faafinayaan shubhooyin.

Culamaduna waxa ay ahaayeen qaar yidhaahda:

(القلوب ضعيفةٌ والشُّبَهُ خَطَّافة)

(Qalbiyadu way taag-daran yihiin, shubhooyinkuna way dafis badan yihiin)

Sida uu **Alxaafid Addahabi-ba** odhanayo.

Gebogabo iyo gunaanad

Muxaadaradaa sheekhu galay oo soconaysay **2:12:34**, **(laba saacadood iyo laba iyo toban daqiiqo, iyo afar iyo soddon il-bidhiqsi)** guud ahaan waxa uu sheekhu kaga warramay mawduucaa **Alle-koodka** ah, hase ahaatee waxa ay ka hadlaysaa nooc kaliya oo noocyada **Alle-koodka** ka mid ah, oo ah: in la dafiro, ama shaki la galiyo ilaahay jiritaankiisa, haddii aan laga tagin waxa uu sheekhu ku dheeraaday iyadan: caalamkan ama kawnkan soo darritaankiisa ama horrayntiisa.

Marka laga warramayo **Alle-koodkana** waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo u sii kala baxaya noocyo badan, labadaa qayboodna waxa ay kala yihiin:

1. **الطَّعنُ في أصل الإسلام**
2. **الطَّعنُ في ثوابت الشَّريعة، دون أصل الإسلام**

1. In la duro asalka islaamka
2. In la duro waxyaabaha uu sugay islaamku, oo aan asalkiisii la durin

Qaybta hore waxa soo hoos galaya afar nooc ama baab:

1. In la dafiro ama shubuhaat laga keeno ilaahay jiritaankiisa, dhammaystirankiisa iyo ujeeddo weyn in uu ilaahay u samaynayo falalkiisa.
2. In la duro Qur'aanka kariimka ah in uu yahay ilaahay hadalkiisii, ama la yidhaahdo gafaf luqadeed, ama saynis ahaaneed ayaa ku jira, ama la yidhaahdo wuu is burinayaa
3. In la duro nabinimada nabi muxammad (calayhi salaatu wassalaam), ama lagu dacniyo nabiga mawaaqif ka mid ah sunnadiisa, sida: guurkiisii uu guursaday caa'isha, ama safiyya, ama lagu duro dumar badan in uu guursaday.
4. In la duro shareecada islaamka wax ka mid ah, sida:
   1) Sheegashada la sheeganayo in shareecada islaamku ay meel kaga dhacday gabadha.
   2) Sheegashada la sheeganayo in diinta islaamku diin qalafsan,oo waxshiya ay tahay.
   3) Sheegashada la sheeganayo in shareecada islaamku ay tahay diin addoonsi, qofkiina ay ka hor istaagayso xorriyaddiisa.

NB: looma jeedo dafirista qaar muslimiinta ka mid ah ay dafiraan shareecooyinkaa soo hor maray wax ka mid ah, ee waxa loo jeedaa qof asalkii islaamka u duraya dafirisita uu dafirayo sharaa'icdaa sababteeda.

Qaybta dambe oo ah in la duro waxyaabaha ay sugtay shareecadu, oo aan asalkeeda la durin waxa soo hoos galaya afar nooc ama afar baab:

1) In la duro daliishadka sunnada nabiga (sallalaahu calayhi wasallama) la daliishanayo, ama lagaga maarmo qur'aanka, ama axaadiithta aaxaadka ah gaar ahaan la diido daliishadkeeda, ama laga hadlo axaadiith gaar ah, iyadoo la sheeganayo in ay caqliga ama xissiga, ama sayniska ka hor imanayso.
2) In shubhooyin lagu soo arooriyo waddada loo marayo fahamka nusuusta sharciga ah.
3) In shubhooyin lagu soo arooriyo saxaabada rasuulka caddaaladdooda iyo Alle-cabsigooda.
4) In shubhooyin lagu soo arooriyo, lana duro ijmaaca, oo daliil sharciya ah
5) In la duro xuduudda sharciga ah qaarkood, sida Rajmiga, iyo dilka murtadka.

Markaa muxaadarada sheekhu iyadoo aad u dheerayd, haddana qaybta hore nooc yar oo ka mid ah kaliya ayuu kaga hadlay sheekhu, waxaynuna ogsoonnahay in soomaalida **Alle-koodkoodu** aanu u badnayn in ay muran ka keenaan ilaahay jiritaankiisa, iyo kawnkan in uu isagu abuuray, kawnkanina ama caalamkanina uu yahay mid soo darriyay oo **محدَث** ah, mid kaste oo soo darriyayna ay mahurtila tahay cid **محدِث** ah oo soo darrisiisay in ay jirto, hase ahaatee ay u badan yihiin asalka islaamka in aanay durin ee ay waxyaabaha shareecadu sugtay ay duraan, sida in ay dacniyaan axaadiithta sixaaxa ah qaarkood iyagoo leh caqliga ama sayniska ayay ka hor imanaysaa.

Diyaariye: axmed daahir (khayr jecle)

Whatsapp number: +252659335111

Email: axmeddaahir1@gmail.com